



Språkstandard 2020. Dokument 5 - samtykke TRAS

Dokumentadministrator: Gudrun Svensson
Godkjent av: Trond Arne Johansen

Gyldig fra: 13.11.2020
Revisjonsfrist: 13.11.2023

Revisjon: 1.1
ID: 5750

5



Oggolaashada isticmaalka foomka la socoshada TRAS

Agaasimaha korriinka ee degmada Kristiansand ayaa wuxuu doonayaa in foomka la socoshada TRAS loo isticmaalo carruurta aan gaarin da'dii dugsiya ee xannaano carruur dhigta. Buuxinta iyo isticmaalka foomkuba waa macluumaad shakhsi oo carruurta laga qaaday, kuwaas oo loo baahan yahay in ay waalidka carruurta oggolaadaan, sidaasna waxaa dhigaya sharciga warbixinnada qofka. Xor baa loo yahay oggolaashada isticmaalka foomka.

Foomku wuxuu noqonayaa mid wax lagu caddaynayo waxaana loo isticmaalayaa la socoshada ilmaha. Waxaa tusaale ahaan loo isticmaalayaa wadhadallada waalidka. Foomka waxaa isticmaalaya shaqaalaha xannaanada carruurta, iyada oo loo isticmaali doono hawl maalmeedka ilmaha. Iyada oo la isticmaalayo warbixinnada foomka ku qoran ayay xannaanada carruurta sida ugu wanaagsan ee suuragalka ah ilma walba isugu duweysaa maalinta xannaanada carruurta.

Madaxa barbaarinta ayaa mas'uul ka ah in ilmaha loola socdo hab wanaagsan oo sax ah. Shaqaalaha xannaanada carruurta oo keliya ayaa arki kara foomka. Foomka iyo warbixinnada foomka ku qoran midna looma gudbin doono dugsiyada ama qof saddexaad iyada oo aanay waalidku taas oggolaan.

Haddii uu foomka TRAS muujiyo in loo baahan yahay in ilma gaar ah lala socdo oo ilmahaas hadafyo gaar ah loo sameeyo, waxaa hadafyadaas la samaynayaa iyada oo waalidka lala kaashanayo.

Waalidka ilmaha had iyo jeer waa loo oggol yahay in uu arko warbixinnada laga qoray ilmaha. Warbixinnada aan saxda ahayn ama aan dhammaystirnayn waxaa la dalbi karaa in la saxo, warbixinnada la dhibsadaana waxaa la dalbi karaa in la tirtiro.

Foomka-TRAS oo la buuxiyey waxaa lagu kaydinayaa faylka carruurta. Waalidku waxay heli karaan foomka la buuxiyey koobigiisa.

OGGOLAASHO

Qofka hoos ku saxiixan waa loo sheegay foomka TRAS. Qofka hoos ku saxiixan wuxuu halkan ku oggolaanayaa in foomka la socoshada ee TRAS laga buuxin karo:

Navn (Magac) _____ Født (Dhashay) _____

Sted: Dato: (Goob: Taariikh:)

Foresatt 1 (Waalidka 1-aad) _____ Foresatt 2 (Waalidka 2-aad) _____